

Xeerar cusub

Doorashada guddiga
degmooyinka (kommunestyre)
iyo golaha gobollada
(fylkeesting) ee 2003da



KOMMUNAL- OG REGIONALDEPARTEMENTET

Warbixin muhiim ah oo doorashada la xiriirta

- xeerar cusub oo la xiriira sida aad codkaaga u dhiibanaysid maalinta doorashada
- xeerar cusub oo la xiriira meelaha aad codkaaga ka dhiiban kartid inta aan la gaarin maalinta doorashada (forhåndsstemme)
- xeerar cusub oo la xiriira sida aad u beddeli kartid warqadda-codbixinta

Isniinta 15ka sibtembar ee 2003da ayay dhacaysaa doorashada guddiga degmooyinka iyo golaha gobollada. Degmooyinka qaarkood ayaa xataa axadda 14ka sibtembar doorasho ka jirtaa. Marka aad codkaaga dhiibato, waxaad ka qaybqaadanaysaa go'aamminta xisbiyada iyo shakhsiyaadka ka mid noqonaya guddiga degmada iyo golaha gobolka.

Sanadkan waxaa soo baxay xeerar cusub oo kuwii hore ka fudud, kuwaas oo la xiriira beddelidda warqadda-codbixinta. Beddelaadda ay doortayaashu ku sameeyaan warqadaha codbixinta ayaa kaalin weyn ka qaadanaysa cidda la dooranayo, awooddii xisbiyadana waa la dhimay. Sidaas darteed waa muhiim in dadka ugu badan ee suuragalka ah ay ka faa'iideystaan fursadda ay u leeyihiin inay ku beddelaan warqadda-codbixinta.

Waxyaalaha cusub ee doorashada sanadkaan

Degmada ayaa go'aaminaysa goobta iyo wakhtiga aad codkaaga dhiibanaysid maalinta doorashada.

Waxaad codkaaga ku dhiiban kartaa gole cod-dhiibasho oo kasta oo ku yaalla degmada aad ku qoran tahay liiskeeda (manntallsført). Sanadkaan codbixiye kasta warqad-doorasho boostada loo soo dhigi maayo sidii doorashooyinkii hore oo kale. Degmo kasta ayada ayaa u madaxbannaan waxay arrintan ka yeeleyso.

Warqadaha codbixinta ee guddiga degmooyinku waa cad yihiin, kuwa golaha gobolladuna waa buluug. Oslo kama jirto doorasho gole gobol.

Sidan ayaad wax u dooranaysaa:

- 1** Qaado warqadda-codbixinta ee xisbiga ama kooxda aad doonaysid inaad u codayso doorashada guddiga degmooyinka iyo golaha gobollada.
- 2** Beddelaad ku samee warqadaha codbixinta haddii aad doonaysid inaad bixisid codad qofeed (personstemmer).
- 3** Sanadkan bokhshado la isticmaali maayo. Isku laab warqadaha codbixinta, si aanay cidi u arag waxaad dooratay.
- 4** U tag hawladeen shaabab ku dhufata warqadaha codbixinta.
- 5** Markaas kaddib warqadaha codbixinta ee shaabbadeysan ku rid santuuqa codbixinta.

Codkaaga ma dhiibanaysaa maalinta doorashada ka hor?

Waxaad codkaaga doorashada ka hor dhiiban kartaa muddada u dhexaysa isniinta 11ka agosto ilaa jimcada 12ka sibtembar.

Doorashadii xafiiska boostada laga dhiiban jiray waa la joojiyay. Degmada ayaa kuu sheegaysa goobta aad codkaaga ku dhiiban kartid maalinta doorashada ka hor. Haddii aad jirran tahay ama curyaan tahay, waxaad degmada ka codsan kartaa inaad gurigaaga codkaaga ku dhiibato.

Degmo kasta ayaa codkaaga ka dhiiban kartaa ayadoon la gaarin maalintii doorashada. Haddii aad doorashada guddiga degmooyinka codkaaga dhiibato doorashada horteed adigoo jooga meel ka baxsan degmada aad ku qoran tahay liiskeeda, ama aad doorashada golaha gobollada codkaaga dhiibato adigoo jooga meel ka baxsan gobolkaaga, waxaa lagu siinayaa hal warqad oo kuwa codka lagu bixiyo ah. Halkaas waxaa ku qoran dhammaanba magacyada xisbiyada siyaasadda, laakiin kuma qorna magacyada dadka sharraxan. Waxaad calaamadaysaa xisbiga aad doonayso inaad u codeyso ama waxaad qoraysaa magaca liis gudaha ah. (lokal liste).

Maalinta doorashada dib cod uma dhiiban kartid haddii aad horey codkaaga u dhiibatay.

Sidee baad u beddelaysaa warqadaha codbixinta?

Warqadaha codbixinta ayaa goynaya xisbiga aad u codeyneyso. Haddii aad doonaysid inaad masharrixiin u codeysid waa inaad beddeshaa warqadda codbixinta/waa inaad bixisaa codad qofeed. Lama oggola in musharrixiin liiska laga tirtiro. Musharrixiinta waa la dooranayaa, ee meesha laga saari maayo. Tilmaamo kuu sheegaya sida aad beddelaadda u samaynaysid ayaa ku qoran warqadda-codbixinta. Ha ka baqin inaad beddelaad samaysid! Warqadda-codbixinta la tuuri maayo xataa haddii aad khalad samaysid.

Doorashada golaha gobollada waxaad...

- cod qofeed siin kartaa musharrixiin ku qoran warqadda-codbixinta. Markaas calaamadee (adigoo istillaab, xarriiq iwm. saaraya) khaanadda u dhow magacyada musharrixiinta aad doonaysid inaad u codeysid. Inta musharrixiin ee aad doonto ayaa siin kartaa cod qofeed.

Dad aad soo leexinaysid kuma qori kartid warqadda doorashada golaha gobollada.

Doorashada guddiga degmooyinka waxaad...

- cod qofeed siin kartaa musharrixiin ku qoran warqadda-codbixinta. Markaas calaamadee (adigoo istillaab, xarriiq iwm. saaraya) khaanadda u dhow magacyada musharrixiinta aad doonaysid inaad u codeysid.

Haddii magaca mid ka mid ah musharrixiintu uu ku qoran yahay khad dhalaaleysa, xisbiga/kooxda ayaa qofkaas tixgelin ka siiyay musharrixiinta kale oo waxaa la siiyay wax loogu yeero cod-dheeri ah (stemmetillegg), kaas oo ay helayaan haddii doortayaashu ay codad qofeed siiyaan iyo haddii kaleba.

Inta musharrixiin ee aad doonto ayaad siin kartaa cod qofeed, magacoodu ha ku qornaado khad dhalaaleysa ama yaanu ku qornaane.

- cod qofeed siin kartaa musharrixiin ka tirsan xisbiyo/kooxo kale, oo loogu yeero u leexin (slengere). Markaas magaca musharrixa meel gooni ah uga qor warqadda-codbixinta ee xisbigaaga.

Ogow markaad qorto dad aad soo leexinayso, in codkaaga qaar loo wareejinayo xisbiyada/kooxaha kale. Qiimaha codkaaga ee xisbiga/kooxda aad dooranaysidna intaas in u dhiganta ayaa laga jarayaa.

Inta leexin ee aad qori kartid waxay ku qoran tahay warqadda-codbixinta.

Fylkestingsvalget 2003

Framifrå Fylke

Fylkeslista

- Kari Korsnes, 1969
- Leif Grutle, 1935
- Marit Strøm, 1952
- Nina Karlsen, 1976
- Terje Guneriussen, 1962
- Mary Smith, 1964
- Arve Olufsen, 1979
- Hans Hansen, 1952
- Signe Martinsen, 1954
- Olav Jensen, 1981
- Sigurd Samuelsen, 1945
- Tony Lindquist, 1982

Kommunestyrevalget 2003

Dalen kommune

Bygdelista for Dalen

- Svein Johansen, 1980
- Maren Berg, 1952
- Lars Holm, 1962
- Nadia Kahn, 1970
- Stine Hansen, 1955
- Inger Østlie, 1974
- Eduardo Perez, 1941
- Hans Hansen, 1952

Personstemme til kandidater på andre lister (slengere)
Skriv navnet her:

Anders Å

Yaa la dooranayaa?

Horta guddiga doorashada ayaa tirinaya warqadaha codbixinta oo markaas helaya inta xubnood ee xisbigu ama kooxdu ku yeelanayaan guddiga degmada ama golaha gobolka. Markaas kaddib ayuu guddiga doorashadu tirinayaa cod-qofeedyada, si loo ogaado musharrixiinta horey soo maraya.

Yaa xaq-codbixin leh marka doorashadu dhacayso?

- *Dadka dhalashadoodu noorwiijiga tahay* ee 18 sano buuxinaya intaan sanadka doorashadu dhammaan, kuwaas oo mar uun loo diiwaan geshay inay Norway ku nool yihiin. Micno ma samaynayso inay u diiwaan gashan tahay inay dibedda ku nool yihiin maalinta doorashada.
- *Dadka u dhashay dalalka kale ee waqooyiga* ee 18 sano buuxinaya intaan sanadka doorashadu dhammaan, haddii loo diiwaan geshay inay Norway ku noolaayeen ugu danbayn 31da maajo ee sanadka doorashada, oo ay weli dalka ku nool yihiin maalinta doorashada.
- *Dadka u dhashay dalal kale* ee 18 sano buuxinaya intaan sanadka doorashadu dhammaan, haddii ay diiwaanka dadweynaha ugu qornayd inay si aan kala go' lahayn Norway ugu noolaayeen saddexdii sano ee ugu danbaysay maalinta doorashada ka hor.

Dhammaanba dadka codkooda dhiibanaya waa inay ku qornaadaan liiska tirakoobka codbixiyayaasha. Waxaad ku qoran tahay liiska tirakoobka codbixiyayaasha ee degmadii aad ka diiwaan gashanayd 31dii maajo sanadkaan. Haddii aad wakhtigaan kaddib guurtay, ciwaankii aad degganayd 31kii maajo ayay ku xiran tahay meesha aad ku leedahay xaqa codbixinta.

Xusuuso aqoonsiga markaad wax dooranayso!

Warbixin dheeri ah oo ku saabsan nidaamkan doorashada ee cusub kala xiriiir degmadaada ama eeg **www.valg.no**.

Ciwaanka internetka ee degmadaadu inta badan waa sidan:
www.magacadegmada.kommune.no

Doorasho wacan!

Waxaa bishii Agosto 2003da soo saaray
Wasaaradda degmooyinka iyo gobollada,
oo ay is kaashadeen Agaasinka ajnebiga.

Lambarka daabacaadda: H-2141 Somali

Daabacaaddan waxay ku jirtaa internetka:
www.valg.no